# Baaritaanada Gaarka ah

In ka badan hal bilyan oo qof ayaa la nool nooc ka mid ah naafada. Inkastoo aysan tani ahayn liiska dhameystiran ee dhammaan baaritaannada, tan ayaa tilmaamaysa qaar ka mid ah xanuunnada ugu badan.

**Werwerka**
Xanuunnada werwerka ayaa ku dhaliya dadka inay dareemaan cabsi aad u daran, walaac, ama cakirnaan inta lagu jiro xaaladaha inta badan dadku aysan dareemin dareennada kuwaan lamid ah.

**Xanuunka Maskax Faluuqa/Camal Xumada (ADHD)**
ADHD waa mid ka mid ah xanuunnada ugu badan ee ku dhaca neerfaha xiliga carruurnimada. Xaalad ku sifaysan sifooyinka ay ku jiraan feejignaan la'aanta, camal xumada, iyo xanaaqa badan. Laakiin dhammaan arimahaan waa inay jiraan si ilmaha loogu aqoonsado inuu qabo ADHD. ADHD waxaa sidoo kale ku jiri kara dib u dhacyada iyo sidoo kale khalkhalka shucuurta.

**Autismka**
Autismku waa xanuun dhanka neerfaha ah oo saameeya awooda ilmaha ee hadalka, fahanka luuqada, ciyaarta iyo xiriirka uu dadka kale la leeyahay.

**Xanuunka Maskax Faluuqa**
Xanuunka maskax faluuqa waa xanuun daran kaasoo leh mania iyo niyad jab soo laalaabta kaasoo socon kara laga bilaabo hal maalin ilaa bilo. Xanuunkaan dhimirka ayaa abuura isbadello qayru caadi ah oo taxane ah oo ku dhaca dareenka, awooda iyo kartida u fakarida si dagan.

**Indhoolnimo/Naafada Aragga**
Naafada aragga ayna ku jirto indhoolnimada ayaa ka dhigan naafo dhanka aragga ah oo aan la sixin karin waxaana ku jira il caweerada iyo indho la'aanta labadab.

**Xanuunnada Nidaamka Dhexe ee Maqalka (CAPD)**
Xanuunnada nidaamka dhexe ee maqalka ayaa saameeya sida maskaxdu u aragto ayna u fahanto waxa dhagtu maqasho, taasoo saamayn xun ku leh qaabka maskaxdu u aqoonsato una fasirto codadka, inta ugu badana codadka hadalka ku jira.

**Naafada Maskaxda**
Naafada Maskaxda, oo sidoo kale loo yaqaano CP, waa xanuun ka dhasha dhaawaca qaybo ka mid ah maskaxda ee maamula awoodeeda adeegsiga murqaheena iyo jirkeena.

**Dhago iyo Indhaba La'**
Erayga "dhago iyo indhaba la" ayaa u muuqan kara sida in qofku uusan wax maqli karin ama arkin karin gebi ahaanba. Erayga ayaa qeexaaya qof qaba heer naafada maqalka iyo aragga ah.

**Dhagoolnimada iyo Luminta Maqalka**
Maqalku waa mid ka mid ah shanteena dareen. Luminta maqalka ayaa caadiyan lagu qeexaa mid fudud, yar, dhexdhexaad, daran, wuxuuna saamayn karaa hal dhag ama labada dhagoodba.

**Xanuunka Niyad Jabka**
Xanuunka Niyad Jabka oo ka balaaran dareenka kooban ee murugta ama niyad jabka. Waa xanuun caafimaad oo daran oo saameeya fikradaha, dareennada, habdhaqanka, shucuurta, iyo caafimaadka jirka.

**Dib u dhaca Kobaca Kobaca**
Dib u dhaca koriimada (DD) ayaa ka dhigan in qofku uusan gaarin isla heerka koriimada ee shaqsiyaadka faciis ah ee aan naafada qabin. Dib u dhac ayaa ku imaan kara keliya hal qayb oo ka mid ah koriimada ama dhawr qaybood. Dib u dhaca guud waa marka ay jiraan dib u dhacyo ka jira ugu yaraan labo aag.

**Down Syndrome**
Down Syndrome waa xanuun dhanka hide-sidaha ah oo ka dhasha koromasoon dheeri ah ee 21 oo



www.parentnetworkwny.org
info@parentnetworkwny.org
716.332.4170

Xog ku qoran dukumiintigaan waxaa lagu abuuray deeq ay bixisay Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka #H325160003. Hase yeeshee, mawduucyadaan daruuri ma ahan inuu matalo xeerka Waaxda Waxbarashada Maraykanka, waana inaadan u qaadan taageero ay bixinayso Dowladda Federaalka ah. Madaxa Mashruuca Carmen Sanchez.

mararka qaar loogu yeero trisomy 21.  Tan ayaa sababi karta caqabado dhanka dhimirka iyo jirka ah labadaba oo ku dhaca qofka.

**Xanuunka qalalka**
Qalalku waa xanuunka suuxdinta. Suuxdinta ayaa dhacda marka maasada kooban, ee awooda badan ee korontada ah ay saamaynayso qayb ama dhammaan maskaxda.

**Xanuunka Daran ee Qabatinka Khamriga**
"Xanuunka Daran ee Qabatinka Khamriga" (FASD) waa weedh guud oo loo adeegsado in lagu qeexo xanuunno kaladuwan oo ka dhasha ilmaha uurka ku jira ee khamradu jirkiisa gaarto.

**Naafada Garaadka**
Naafada garaadka (I/D) waa eray loo adeegsado marka qof uu qabo caqabadaha gaarka ah ee maskaxda iyo xirfadaha sida hadalka, daryeelida naftiisa ama nafteeda iyo xirfadaha la dhaqanka bulshada.

**Naafooyinka Waxbarashada**
Waxaa ku jira, laakiin kuma koobna, dyslexia, dyscalcula, iyo dysgraphia. Naafada waxbarashada waa eray guud oo lagu qeexo noocyada gaarka ah ee caqabadaha waxbarashada. Xirfadaha badanaa saamayntu ku dhacdo waa akhriska, wax qorista, dhageysiga, ku hadalka, sababaynta, iyo samaynta xisaabta.

**Naafada Neerfaha**
Naafada neerfaha waa xanuun ku dhaca nidaamka neerfaha ee jirka. Caqabadaha dhismaha, kiimikada noolaha iyo korontada ee maskaxda, araxda ama neerfeyaasha kale ayaa keeni karta calaamado kaladuwan.

**Xanuunka Shaqada Dareemaha (SPD)**
Xanuunka Shaqada Dareemaha waa xanuun dhanka neerfaha ah kaasoo jira marka digniinaha dareemuhu aysan u nidaamsanayn jawaabaha haboon uuna ka hor istaago qaybaha qaar ee maskaxda inay helaan xogta ay u baahan yihiin si looga shaqeysiiyo xogta dareemaha khaldan.

**Xanuunka Lafdhabarta**
Xanuunka Lafdhabarta waa mid ka mid ah ciladaha ugu badan ee dhanka dhalmada ee ka jira Mareykanka, kuwaasoo yimaada inta lagu jiro bisha koobaad ama inta aad uurka leedahay wuxuuna ka dhigan yahay in laf dhabarta ilmuhu aysan si buuxda u xirmin. Waxyeelo ku dhacda neerfeyaasha iyo laf dhabarta ayaa imaan kara.

**Tourette Syndrome**
Tourette Syndrome waa xanuun dhanka neerfaha dhimirka oo caan ku ah lawlawga (dhaqdhaqaaqa aan qofku xukumi karin, boobsiiska ah, ee lama filaanka ah) iyo/ama dhawaaq qofku si joogto ah u samaynaayo.

**Dhaawaca Argagaxa Maskaxda**
Dhaawaca Argagaxa Maskaxda ama TBI, waa dhaawac saameeya sida maskaxdu u shaqeyso wuxuuna keeni karaa dhibaatooyin dhanka jirka iyo/ama garaadka ah.

PARENT NETWORK OF WESTERN NEW YORK

www.parentnetworkwny.org
info@parentnetworkwny.org
716.332.4170

Xog ku qoran dukumiintigaan waxaa lagu abuuray deeq ay bixisay Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka #H325160003.  Hase yeeshee, mawduucyadaan daruuri ma ahan inuu matalo  xeerka Waaxda Waxbarashada Maraykanka, waana inaadan u qaadan taageero ay bixinayso Dowladda Federaalka ah.  Madaxa Mashruuca Carmen Sanchez.